# TALLAABO DEGDEG AH

## XABSIGA HALAGA SII DAAYO SACDIYO BAJAAJ

**Xubno ka tirsan hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (NISA) ayaa Sacdiyo Macalin Cali oo ah gabar ku shaqaysata Bajaaj isla markaana u dhaq-dhaqaaqda arrimaha bulshada ku xiray caasimadda Muqdisho, iyadoo loo haysto olole ay ka billowday baraha bulshada iyo cabasho ay u soo bandhigtay si nabdoon. Waxaa markii hore laba maalmood lagu hayay saldhigga booliska ee degmada Xamar Jajab, ka hor intii aan 14-kii April loo gudbin Xabsiga Dhexe ee Muqdisho oo ay haatan ku xiran tahay. Qoyskeedu ma oga dacwad rasmi ah oo laga gudbiyay, balse ilo xog ogaal ah ayaa u sheegay Amnesty International in booliska ay Sacdiyo geeyeen maxkamadda gobolka Banaadir taasoo u oggolaatay xabsi xalaaleyn 90 cisho ah. Xarigeeda ayaa salka ku haya in ay si nabdood u soo bandhigtay xuquuqdeeda bani'aadannimo. Amnesty International waxa ay ugu baaqaysaa mas'uuliyiinta Soomaaliya in si degdeg ah oo shuruud la'aan ah lagu sii daayo Sacdiyo.**

### TALLAABO QAAD: LUUQADAADA KU QOR BAAQ AMA ISTICMAAL WARQADDAN TUSAALAHA AH

***Mudane Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud***
*Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya*
*Xafiiska Madaxweynaha*
*Villa Soomaaliya, Muqdisho, Soomaaliya*
*Email:* info@presidency.gov.so
*X: @HassanSMohamud*

*Mudane Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud*

*Waxaan ka walaacsanahay xariga aan loo meeldeyin ee lagula kacay Sacdiyo Macalin Cali (oo loo yaqaan "Sacdiyo Bajaaj") oo ay laamaha amniga ee Soomaaliya u beegsadeen olole ay ka waday baraha bulshada iyo cabasho ay u soo bandhigtay si nabdoon.*

*Sacdiyo Macalin Cali oo ah 27 jir ku shaqeysata Bajaaj isla markaana u ololeysa arrimaha bulshada ayaa xubno ka tirsan hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (NISA) waxa ay 12-kii April ka qabteen degmada Hodan ee caasimadda Muqdisho. Waxaa markii hore lagu hayay saldhigga booliska ee degmada Xamar Jajab, ka hor intii aan 14-kii April loo gudbin Xabsiga Dhexe ee Muqdisho oo ay haatan ku xiran tahay. Ma aysan helin qareen metala, qoyskeeduna ma oga dacwad rasmi ah oo laga gudbiyay, balse ilo xog ogaal ah ayaa u sheegay Amnesty International in booliska ay Sacdiyo geeyeen maxkamadda gobolka Banaadir taasoo u oggolaatay xabsi xalaaleyn 90 cisho ah. Xarigeeda ayaa salka ku haya in ay si nabdood u soo bandhigtay aragtideeda oo ay ku soo gudbisay baraha bulshada, gaar ahaan Facebook iyo TikTok. Waxyaabaha ay ka hadashay waxaa kamid ah; dhaliil ay u jeedisay dowladda, musuq-maasuq la sheegay inuu ka dhexjiro dowladda, shaqo la'aanta haysata dhalinyarada, eex lagu eedeeyay madaxda sare ee dowladda, canshuuraha badan iyo qiimaha shidaalka ee kordhay. Mid kamid ah muuqaalladeeda ayay ku sheegtay in wixii dhibaato ah oo soo gaarto uu mas'uuliyadeeda qaadayo Madaxweynaha Soomaaliya.*

*Laga billaabo bartamihii ilaa dhammaadkii 2022, waxa ay dowladda Soomaaliya qaaday falal ka dhan ah xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka, ka mid noqoshada ururada iyo isu soo baxyada nabdood. Waxa ay adeegsatay xariga aan loo meeldayin, xabsi, hanjabaad iyo cabsi gelin ay ku aamusinayso weriyayaasha, xarumaha warbaahinta, dadka u ololeeya bulshada iyo dadyowga kale ee sida nabdoon u soo bandhiga tabashadooda. Beegsigaas ayaa meel ka dhac ku ah waajibaadka Soomaaliya ka saran sharciga xuquuqda aadanah. Waxaa looga baahan yahay dowladda Soomaaliya in ay ilaaliso waajibaadka ka saran shuruucda gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee khuseeya xuquuqda aadanaha, gaar ahaan ilaalinta xoriyadda hadalka, ka mid noqoshada ururada, isu soo baxyada nabdood iyo madax bannaanida saxaafadda.*

***Waxaan ugu baaqayaa adiga iyo dowladdaada in si degdeg ah oo shuruud la'aan ah loo sii daayo Sacdiyo Macalin Cali oo loo xiray in ay si nabdoon u soo bandhigtay xuquuqdeeda bani'aadannimo. Inta laga sii deynayo, waxaan ku baaqayaa in la xaqiijiyo in xaaladda goobta lagu hayo ay waafaqsan tahay heerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, in Sacdiyo laga ilaaliyo jirdil iyo xadgudub kale, in ay hesho daryeel caafimaad, isla markaana loo oggolaado in ay la kulmaan qoyskeeda iyo qareennadeeda.***

*Qadarin,*

# MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Ma aha markii koobaad ee Sacdiyo Macalin Cali loo xiray u dhaq-dhaaqidda arrimaha bulshada. Waxaa horay loo xiray 12-kii March kadib markii ay ka qeybgashay dibedbax looga soo horjeedo shidaalka qaaliga noqday. Waxaa la geeyay maxkamad, waxaana la soo daayay afar maalmood kadib. Tani waxa ay muujinaysaa in Sacdiyo loo beegsado si nabdoon u soo bandhigga xuquuqdeeda aadanaha.

Tan iyo bartamihii 2022 markii uu xilka la wareegay Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud, waxaa Soomaaliya ka dhacay falal ka dhan ah xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka, ka mid noqoshada ururada iyo isu soo baxyada nabdood. Dowladdu waxa ay adeegsatay xariga aan loo meeldayin, maxkamadeyn aan cadaalad ahayn, xabsi, hanjabaad iyo cabsi gelin ay ku aamusinayso weriyayaasha iyo dadka u ololeeya bulshada.

Tan iyo 2025, dowladda ayaa xoojisay iskudayga ay ku xakameynayso oo ay ku faafreebayso weriyayaasha ka warrama arrimaha danta guud, gaar ahaan wararka khuseeya amniga iyo barakicinta shacabka Muqdisho. 16-kii March 2025, wasiirka warfaafinta ayaa mamnuucay in "wax xun laga sheego hawlgallada amni ee ay wadaan ciidamada dowladda" ama "warar been ah laga faafiya howlgallada amniga ah ee ay fuliyaan ciidamada dowladda."

**LUUQADA LA DOORBIDAYO IN LAGULA HADLO CIDDA AY KHUSEYO WARQADDA:** Ingiriis
Waxaad sidoo kale ku qori kartaa luuqadaada.

**FADLAN SI DEGDEG AH U QAAD TALLAABO, KA HOR:** 24 Agoosto 2026
Haddii aad rabto in baaqa aad dirto mudadaas kadib, fadlan la xiriiir xafiiska Amnesty International ee dalkaaga.

**MAGACA: Sacdiyo Macalin Cali**